# AXDIGA MIDOWGA AFRIKA EE DHAWRISTA IYO U-GARGAARKA BARAKACAYAASHA EE AFRIKA

(AXDIGA KAMBALA)

# WAR BIXIN KOOBAN

Barakaca malaayiin qof oo ku barakacey dalalkooda, sababo la xiriira masiibooyin dabiici ah, colaado hubeysan ama xaalado kale oo qalalaase, waxay noqotey barkii labaad ee qarnigii labaatanaad walaac bini'aadanimo oo ba'an. Tirada barakacayaasha gudaha ayaa sii kordhey qarnigaan cusub, iyadoo dhalisey  xaalad bini'aadaminimo oo ba'an, iyo saameyn bulsho iyo mid dhaqaale.

Afrika waa qaarad si gaar ah isbedelkaasi u saameeyey. Iyadoo laga jawaabayo caqabadda ka hor tagidda iyo wax ka qabashada barakaca gudaha ee qaaradda, iyadoo loo marayo Midowga Afrika (MA) dawladaha Afrikaanka ah waxay isugu yimaadeen curinta Axdiga Midowga Afrika ee Dhawrista iyo U-gargaarka Barakacayaasha ee Afrika (Axdiga Kampala ama Axdiga) ee 2009dii. Heshiiskaan cusub, ee sharci dhaqal-gal ah kii ugu horeeyey Caalamka ee Barakacaayasha gudaha, wuxuu dhaqan galey 2002dii, kadib markey ansixiyeen 15 dawladood. Maanta, 25 dawladood oo Afrikaan ah ayaa qeyb ka ah Axdiga Kampala, meesha 18 kale ey saxiixeen balse wali aysan ansixin.

Gudiga Caalamiga ah ee Laanqeyrta Cas (ICRC) waxay daah-furtey hawl qiimeyn ah si loo taageero dadaalka Midowga Afrika, Urur Goboleedada dhaqaalaha (REC), Hanaan goboleedada ka hor-tagga, maareynta iyo xallinta khilaafaadka (RMs), iyo Dawladaha Xubinta ka ah Axdiga Kampala si hufan loo dhaqan-geliyo looguna daba-galo Axdiga. Hadafkeena isu-xilqaamidda hawshaan waa mid fudud oo ah: in la kaabo sidii kor loogu qaadi lahaa wax ku ool-nimada Axdiga si loo dhimo barakaca gudaha ka dhasha dagaaladda hubeysan iyo xalaadaha kale ee qalalaase iyo in hagaajinta dhawirsta iyo u-gargaaridda Barakacayaasha Gudaha Afrika.

ICRC waxay muddo dheer ka shaqaynaysay dhawrista iyo caawinta Barakacayaasha Gudaha aduunka oo dhan, iyadoo waajibkayaga shaqo ey qeyb ka tahay caawinta dadka ey saameeyeen dagaaladda hubeysan iyo xaalada kale ee qalalaase. ICRC-du sidoo kale waxay bilowgii ka qeyb noqotey taageeridda Axdiga Kampala. Waxaan ka qeyb galney qabyo-qoraalkii Axdiga, bixinta talooyin sharci oo ku saabsan Xeerka Caalamiga ah ee Aadaminimada (IHL) iyo taageeridda wada-hadalladii lagu meel mariyey Axdiga Oktoobar 2009dii. Ilaa xiligaas, ICRC-du waxay si dhow ula shaqeynaysay Golaha Midoga Afrika (AUC) iyo Dawladaha Afrika si ey ugu dhiiri geliso uguna taageerto ansixinta, fulinta iyo meel-marinta wadaniga ah iyo talaabooyin dhaxal gal ah oo lagu dhaqan-galinayo Axdiga Kampala ee heer qaran. Ilaa xilligan, waxaanu ku bixinaa talo sharci oo ku saabsan sida loo ansixin karo axdiga iyo qaababka caadiga ah ee gudaha looga hirgelin karo xoojinta Axdiga. Intaas waxaa dheer, wada-hadalkayaga shaqo ee dawladaha guud ahaan Afrika, waxaanu kula talinaa talooyin sugan oo dawladuhu qaadan karaan si ey u ansixiyaan una hirgaliyaan Axdiga.

ICRC-du waxay toboneeyo sano soo saareysay aalado Dawladaha siiya taageero farsamo iyo tusaale oo ku saabsan hir-gelinta heer qaran ee IHL-ka iyo sharciyada kale ee xiriirka la leh. ICRC-du waxay uga faa'idey khibradda iyo waayo aragnimadda iney qabato hawl qiimeynta hadda. Intaas waxaa dheer, waxaanu awoodnaa inaan ka faa'idno joogitaan keena  Afrika, halkaas oo Ergooyinka ICRC-da 29 dal ka sameysa hawlo dhawris iyo gargaar loogu talo galey barakacayaasha, bulshada marti-gelisa barakacayaasha iyo dhamaan kuwa ku dhibaatoobey saameynta dagaalo hubeysan ama xaalado kale ee qalaalase.

Intii lagu guda jirey qeybtii hore ee 2016dii, Ergooyinka ICRC-du dhamaan Afrika waxay bixiyeen xogo iyo falanqeyn ku saabsan horumarka laga arrinta barakacayaasha iyadoo ey ku jirto talaabooyinkii ugu dameeyey ee kusoo biiridda, fulinta heer qaran,

iyo dhaqan-gelinta Axdiga Kampala. Waxaa ka mid ah kuwaaas Dawladaha ansixiyey Axdiga Kampala iyo Dawladaha aan ansixin balse sameeyey xeerar hoosaad iyo siyaasado ku saabsan dhawrista barakacayaasha oo ku saleysan qodobaddii 1998dii ee Mabaad'ida Hagidda Barakacayaasha Gudaha (Mabaad'da Hagidda) iyo labadii hab-maamuus ee Harooyinka Waaweyn. Qaar ka mid ah Dawladaha wajahaya xaalado barakac balse aan lahayn sharciyo qarameedyo ayaa sidoo kale la tix-geliyey.

Lataliye madaxbanaan oo ICRC-du hawl-gelisay ayaa isu-geeyey oo falanqeeyey taladaan deegaanka timi wuxuuna kasoo diyaariyey natiijooyin (Casharadda laga bartey, tusaalooyin wanaagsan iyo caqabadaha ugu waaweyn) iyo talooyin. Kuwaani waxay ka turjumayaan falanqeyn aragtiyo 25 dal oo Afrikaan ah.

Natiijooyinka waxay sawir ka bixinayan heerka hir-gelinta Axdiga Kampala ee hadda. Waxay muujinayaan dadaalada Dawladaha ku saabsan sidey u gudanayaan masuuliyadahooda la xiriira ka hor-tagga iyo waxqabashadda barakaca gudaha.

Talooyinka waxaa loogu talo galay Dawladaha, laakiin sidoo kale waxay khuseeyaan hay'adaha kale (sida AU, RECs iyo RMs, UN, ICRC iyo ururada bulshada rayidka ah) waxay ku saleysanyihiin Natoojooyinka iyo sidoo kale cilmi baaris dheeraad ah iyo la talin ka timid gudaha ICRC iyo daneeyayaasha dibadda laga soo xushay. Waxaa loo qaabeyey tallaabooyinka la soo jeediyey si wax looga qabto caqabadaha hortaagan hirgelinta Axdiga, iyadoo si qoto dheer loo eegayo hababka hadda jira ee fulinta lagu xoojin karo. Talooyinku dhamaan iyagoo aan kala sooc lahayn waa masuuliyadda dawladaha si ey u gutaan waajibaadkooda sharciga caalamiga iyo heer qaran.

Hawsha qiimeynta iyo warbixintan waxa ay xoogga saarayaan waajibaadka ku xusan Axdiga Kampala oo si toos ah looga soo qaatay IHL/ama arrimo la xiriira bani'aadamnimada oo ICRC la kulanto hawlgalada ka fuliso guud ahaan Afrika. Markii la qoraayey warbixintaan, waxaan ku dadaalnay in aan maanka ku hayno su'aalaha soo socda:

- Waa maxay Axdiga Kambaala saameynta ku yeelan karo meesha hawsha ka socoto?
- Muxuu isbedel ku keeni karaa nolosha barakacayaasha?
- Maxaa kale oo loo baahanyahay in la qabto –Dawladaha, Guddiga Midowga Afrika(AUC), Urur Goboleedada Dhaqaalaha (RECs), Hanaan goboleedada ka hor-tagga, maareynta iyo xallinta khilaafaadka (RMs) ICRC iyo hay'adaha kale iyo kuwa ka shaqeeya bani'aadamnimada – si buuxda u meel marinta Axdiga Kampala si uu u noqdo mid hir-gala?

Warbixintaan waxay ka koobantahay ilaa 80 natiijooyin iyo 25 talo. Waxaana loo kooxeeyey shan madax, si waafaqsan waajibaadka sharciga ah iyo tallaaboyinka la xiriira ee loo baahanyahay si loo fuliyo waajibaadka sharciga ah:

1. Ka hortag
2. Qorsheynta, maamulka iyo daba-galka dhawrista iyo hawlaha gargaarka
3. Barakacayaasha oo la siiyo gargaar bani'aadamnimo oo ku filan
4. Dhawrista barakacayaasha
5. Xal waara oo loo helo barakacayaasha

ICRC waxay rajeyneysa in mid kasta oo ka mid ah Natiijooyinka iyo talo soo jeedinta ay daneynayan Dalalka qaar, iyadoo ku xiran habkooda gaarka ah ee Axdiga Kampala. Dhawr mawduucyo isku dhaf ah ayaa soo baxay markii la sameynayey Natijooyinka iyo talo soo jeedinta saddex mudnaan gaar ah leh:

1. Muhiimadda Dawladaha iyo daneeyayaasha kale ay u leedahay wada-xaajoodka la yeelanaayan bulshooyinka barakacayaasha si loo hubiyo ka-qeybgal wax ku ool ah oo ku saabsan go'aan qaadashada sharciga, siyaasadaha iyo barnaamijyada ayaga saameynaya;

2. Baahida deg degga ah si hubiyo in Barakacayaasha Gudaha loo helo adegyada asaasiga ah sida daryeelka caafimaadka iyo waxbarashada;
3. Doorarka muhiimka ah ee AUC- iyo RECs iyo RMs- ayaa mustaqbalka ka cayaari doonaa dib u xoojinta dadaalada Dawladaha Xubnaha ka ah Midowga Afrika in si buuxda u fuliyaan Axdiga Kampala.

Iyadoo qeybta casharada la bartay laga soo qaatay hawsha dib u eegidda, warbixintu waxay hoosta ka xariiqeysaa ka hor inta aan dhibaato dhicin si loo hubiyo waajibaadyada ku qoran Axdiga Kambaala oo loo bedelay sharciga heer qaran.Tani waxaa ka mid ah in la meel dhigo hababka lagama maarmaanka iyo waajibaadka iyo kheyraadka si looga jawaabo baahiyaha dhawrista iyo gargaarka barakacayaasha. Wadashaqeyn wax ku ool ah oo u dhaxeysa wasaaradaha kala duwan iyo hay'adaha dawladda oo khuseysa, iyo sidoo kale u dhaxeysa mas'uuliyiinta dawladda ee heerarka dhexe, mid goboleed iyo mid deegaan waa muhiim. Gaar ahaan waayo-aragnimadu waxay muujineysa in la hubiyo habka loo wada dhan yahay oo ku lug leh dhammaan daneeyayaasha gudaha ee muhiimka ah oo ka bilaabanaya barakacayaasha iyo bulshooyinka martigeliya kuwaas oo u baahan in laga qeybgeliyo wada-tashiyada, wadaagida macluumaadka iyo go'aan qaadashada.

Marka ay timaado xaqiijinta in barakacayaasha ay helayan baahiyaha lagama maarmaanka ah iyo adeegyada asaasiga ah (sida daryeelka caafimaadka,waxbarashada iyo baafinta iyo adeegyada dib-u mideynta qoyska), la'aanta  xoog dad iyo dhaqaalaha badanaa waa caqabad haysata Dawladaha si ay u fuliyaan waajibaadkooda asaasiga ah.Sidaas daraadeed, helitaanka wax ku oolka ah ee barakacayaasha ka helayan hay'adaha bani'aadamnimada ayaa ah qodob muhiim u ah sidii loo dabooli lahaa baahida dadkaas barakacayaasha ah. Sidoo kale muhiiimadu waa ballanqaadka hay'adaha dawliga ah iyo kuwa caalamiga ah in ay u hoggaansamaan mabaad'ida bani'aadamnimada ee u gargaaridda dadka barakacayaasha ah.

Marka la xaqiijinaayo dhawrista wax ku oolka ah ee barakacayaasha, warbixintu waxay muujisey caqabadaha ah helitaanka isu-dheelitirka arrimaha bani'aadanimo iyo amniga ee lagu nidaaminaayo dhaqdhaqaaqa barakacayaasha iyo sidoo kale kuwan joogteynaya dadka rayidka saxda ah iyo xaaladaha bani'aadamnimo ee goobaha barakacayaasha. Fariin kale, dhibaatooyinka badanaa wajahaan barakacayaasha ee helitaanka dukumentiyada rasmiga ah(sida dukumentiyada aqoonsiga shakhsi ahaaneed) waxay saameyn ku yeelan kartaa awoodda ay u heli karaan adeegyada asaasiga ah iyo fursadaha hab-nololeedka. Hal cashar oo muhiim oo laga bartey oo ah istaraatijiyado maangal-ka ah ee sameynta ama bedelidda qoraal rasmiyeedkan oo kale in ey kaalin weyn ka qaadan karaan ka jawaabidda xaaladaha deg degga ah ee Aadaminimada.

Marka colaad hubeysan ay socoto Dawladaha iyo dhinacyada kale ee ku lugta leh dagaalka waa in ay qaadaan tallaabooyin ay qaadi karaan, iyo xaalado badan ay tahay in ay sameeyaan si looga hortago in barakac uu ka dhaco sideedaba. Waxay si gaar ah u hubineysaa in la ixtiraamo xeerka Aadaminimada (IHL) iyo in la kordhiyo dadaalada lagu dhawrayo dadka rayidka ah iyo in la xadido dhibaatada ku dhaceysa. Marka la eego, xadgudubyada lagu xad-gudbo IHL-ka waxay noqoneyaan sababta ugu weyn ee keenta barakaca gudaha ee la xiriira colaada Afrika. Caqabadaha jira waa xoojinta ballanqaadyada Dawladaha (iyo awoodda) si ay u ixtiraamaan ayna u xaqiijiyaan ixtiraamka loo hayo IHL-ka.

Ugu dambeyn, kaalinta muhiimka ay cayaareen AU, RECs iyo RMs ee hore u socoshada warbixintu waxay xaqiijineysa baahida loo qabo dadaalo wadashaqeyn oo dheeri ah si loo kordhiyo wacyigelinta arrimaha barakaca gudaha iyo in Dawladaha xubinta ka ah AU dhexdooda lagu dhiirigeliyo Axdiga Kampala.

Maanta, Axdiga Kampala wuxuu bixiyaa hanaan guud oo horayba u soo bilowday si loo helo hagaajin la taaban karo oo lagu sameeyo nolol maalmeedka barakacayaal badan oo Afrika ku sugan. Si loo xaqiijiyo awoodeeda buuxda, si kastaba ha ahaatee, Wadamada Afrikaanka waa in si nidaamsan oo dhammeystiran ugu bedelaan ku dhaqan. Rajada ayaa ah in warbixintan gacan ka geysan doonto shaqada muhiimka ah ee hir-gelinta Axdiga Kampala oo faa'ido u ah barakacayaasha hadda iyo kuwa mustaqbalka ee Afrika.

## LIISKA TALOOYINKA

Dhammaan talo soo jeedinta ku xusan warbixinta waxaa halkaan loogu diyaariyey si loo fududeeyo tixraaca.Talo kasta iyo fikirkeeda taageerida ah waxaa laga dheehan karaa warbixinta gudaheeda.

### 1. KA HOR TAG

**DAWLADAHA**

Talo soo jeedin 1: Dawladaha aan weli sidaas sameynin, waa in ay dedejiyaan ansixintooda, ku soo biiritaankooda, Axdiga Kampala.

Talo soo jeedin 2: Dawladaha qeybta ka ah Axdiga Kampala waa in ay bilaabaan oo ay dhammeystiraan tallaabooyin ay ugu biirinayaan waajibaadka heshiisyadaan sharciga iyo xeerarka gudaha oo ay ku jiraan xeerarka ciqaabta, weydiisashada talo iyo taageero farsamo haddii /sida loogu baahdo.

Talo soo jeedin 3: Dawladuhu waa in ay qaadaan tallaabooyin lagu kobcinaayo aqoonta Axdiga Kampala ee dhammaan daneeyayaasha uu khuseyso oo ay ku jiraan barakacayaasha gudaha naftooda, bulshooyinka martigeliyey, bulshada rayidka ah iyo hay'adaha dawliga ah heer qaran, heer gobol iyo heer degaan.

Talo soo jeedin 4: Dawladuhu waa in ay hubiyaan in dhammaan hay'adaha dawliga ah-oo ay ku jiraan ciidamada xoogga hubeysan iyo ciidamada amniga in si buuxda loogu wargeliyo waajibaadkooda lana faro in ay ixtiraamaan ayna hubiyaan ixtiraamka loo hayo xeerka caalamiga ee aadminimada.

**DANEEYAYAASHA KALE**

Talo soo jeedin 5:Hay'adaha caalamiga ah iyo kuwa bani'aadamnimada waa in ay sii wadaan talooyinka farsamo iyo taageerada ay siinayaan Dawladaha Xubnaha ka ah Midowga Afrika, oo keliya aan aheyn in ay ansixiyaan Axdiga Kampala, laakiin sidoo kale tallaabooyin buuxa ee hanaanka fulinta looga baahanyahay oo waafaqsan habka sharciga qaranka iyo siyaasadda.

Talo soo jeedin 6: Iyadoo lala kaashanaayo Dawladaha iyo daneeyayaasha ururada bulshada rayidka, AUC, RECs iyo ururo kale oo khibrad u leh majaalkan waa inay ballaariyaan kor u qaadida wacyigelinta dadweynaha iyo hawlaha awood dhisida oo ku saabsan Axdiga Kampala. Golaha Arrimaha Bini'aadaminimada iyo Xuquuqda Dadweynaha (ACHPR) iyo wakiilkeeda gaarka ah ee qaxootiga, dadka magangelyo-doonka ah iyo dadka gudaha ku barakacay ayaa door ka ciyaari kara arrinkaan, si waafaqsan waajibaadkooda iyo doorka ay ku leeyihiin Axdigan.

Talo soo jeedin 7: AUC iyo Dawladaha Xubnaha ka ah Midowga Afrika waa in ay xaqiijiyaan in Shirweynaha ugu horreeya ee Dawladaha Qeybta ka ah uu dhacaayo sida ugu dhakhsaha badan ayana hirgeliyaan qorshe hawleed dhammeysatiran/khariirad lagu hawlgelinaayo Axdiga Kampala.

## 2. QORSHEYNTA, MAAMULKA IYO KOR JOOGTEYNTA DHAWRISTA IYO HAWLAHA GARGAARKA

**DAWLADAHA**
Talo soo jeedin 8: Dawladuhu waa in ay qaadaan tallaabooyin si loo hubiyo in hay'adda ama kooxda loo xilsaarey isu-duwida ay leedahay waajibaadka lagama maarmaanka ah iyo sharciyadda in ay abaabulaan dhammaan wasaaradaha iyo hay'adaha ay khuseyso lana siiyo kheyraad ku filan (dad iyo dhaqaale) si wax tar leh ugu shaqeyso.

Talo soo jeedin 9: Hay'adaha dawladdu waa in ay horumariyaan awoodaha ku filan dhammaan heerarka kala duwan si loo ururiyo loona joogteeyo xog sugan oo ah baahiyaha waqtigaas taagan, u nuglaanshaha iyo awoodaha barakacayaasha iyo sidoo kale xalalka joogtada ah oo ay ku jirto xog loo kala saaray (jinsi, da' iyo arrimo kale oo khuseeya).

Talo soo jeedin 10: Hay'adaha dawladdu waa inay si firfircoon u hubiyaan wadatashiga iyo ka qeybgalka firfircoon ee barakacayaasha iyo bulshooyinka martigeliya si loo hubiyo ka qeybqaadashada go'aan qaadashada waxqabadyada magacooda lagu soo qaatay. Ka qeybqaadashan waa inay tixgelisaa noocyada kala duwan ee dadka barakacay (sida jinsiga, da'da iyo arrimo kale).

Talo soo jeedin 11: Mas'uuliyiinta dawladda ee heerarka kala duwan oo leh mas'uuliyadaha bixinta gargaarka waa in ay dejiyaan habab kor joogteyn ah oo lagula soconaayo natiijooyinka mudada gaaban iyo mudada dheer. Kuwani waa in lagu daraa waxyaaabaha ku habboon ee barakacayaashu kula xisaabtami karaan.
Daneeyayaasha kale

Talo soo jeedin 12: Marka Dawladaha lagu taageerayo horumarinta shuruucda iyo siyaasadaha oo ay ku jirto istraatijiyada qaranka ee barakacayaasha gudaha, jilayaasha kale waa in ay ayidaan hababka ugu sareeya ee sugi kara lahaanshahooda.

## 3. BARAKACAYAASHA OO LA SIINAYO GARGAAR BANI'AADAMNIMO OO KU FILAN

**DAWLADAHA**
Talo soo jeedin 13: Qiimeyntu waa in ay eegto baahiyaha iyo awoodaha barakacayaasha, iyo sidoo kale bulshooyinka martigelinaya, mas'uuliyiinta maxalliga iyo adeegyada waa in si joogto ah ugu wargeliyaan qorshaha ka jawaab celinta barnaamijyada.

Talo soo jeedin 14: Dawladuhu waa in ay horumariyaan awoodaha si ay u odorosaan u qiimeeyaan oo si wax ku ool ah wax ugu qabtaan, baahiyaha kala duwan ee barakacayaasha.

Talo soo jeedin 15: Dawladuhu waa in ay hubiyaan in dhammaan hay'adaha dawliga ah ee khuseysa- oo ay ku jiraan xoogaga ciidamada hubeysan iyo ciidamada amniga- ay si buuxda ugu wargeliyaan waajibaadkooda kuna amraan in hay'adaha bani'aadamnimada u fududeeyaan gaaritaan si fudud oo aan la xayirin ay ku gaaraan barakacayaasha. Sidoo kale waa in ay hubiyaan in barakacayaasha ay helaan baahiyahooda asaasiga ah (biyo, cunto, hoy iwm.) iyo helitaanka adeegyada asaasiga ah (daryeelka caafimaadka, waxbarashada iwm.)

**DANEEYAYAASHA KALE**
Talo soo jeedin 16: Daneeyayaasha kale waa in ay hubiyaan in codsiyada hay'adaha bani'aadamnimada ee gaaritaanka barakacayaasha u dalbanaayan si fudud ah oo aan la xayirin ay u dhacdo iyo sidoo kale hawlaha la hirgeliyey iyadoo la raacayo gaaritaankan

oo si buuxda u waafaqsan mabaad'ida aadaminimada, dhexdhexaadnimada, eex la'aanta iyo madaxbannaanida hay'adaha samafalka..

## 4. DHAWRISTA BARAKACAYAASHA

**DAWLADAHA**

Talo soo jeedin 17: Dawladuhu waa in ay hubiyaan in mas'uuliyiinta dawliga ah oo ay khuseyso- oo ay ku jiraan xoogga ciidamada hubeysan iyo ciidamada amniga- ay si buuxda ugu wargeliyaan waajibaadkooda kuna amraan in ay fududeeyaan xorriyadda dhaqdhaqaaqa iyo deganaanshaha barakacayaasha.

Talo soo jeedin 18: Mas'uuliyiinta Dawladdu waa in awoodo ku filan ku kobciyaan heer qaran iyo kan maxalliga si loo abuuro loona joogteeyo diiwaanka barakacayaasha lana cusbooneysiiyo. Tani waxay dhammaan daneeyayaasha ey khuseyso siin kartaa meel laga anbo qaado (baseline) oo la isku raacay.

Talo soo jeedin 19: Si loo hubiyo in barakacayaashu ay awoodaan in waqti macquul ah ay helaan warqadaha aqoonsiga mas'uuliyiinta dawladdu waa in ay qoondeeyaan dadaalo iyo kheyraad ku filan.

Talo soo jeedin 20: Mas'uuliyiinta dawladdu waa in ay xoojiyaan sharciyadooda iyo tallaabooyin la taaban karo si loo hubiyo in xaaladaha rayidka iyo goobaha barakacayaasha la joogteeyo.

**DANEEYAYAASHA KALE**

Talo soo jeedin 21: Hay'adaha caalamiga iyo daneeyayaasha samafalka waa in taageero la isku duway siyaan Dawladaha si loo hubiyo nidaam wax ku ool ah oo hufan oo wax looga qabanaayo baafinta qoyska iyo baahiyaha dib- u mideynta qoyska.

## 5. XAL WAARA OO LOO HELO BARAKACAYAASHA GUDAHA

**DAWLADAHA**

Talo soo jeedin 22: Dawladuhu waa in ay hubiyaan in dhammaan laamaha iyo hay'adaha dawliga ahba in si buuxda loogu wargeliye wadatashiga macnaha leh iyo ka qeybgalka firfircoon ee barakacayaasha iyo bulshooyinka martigelinaya ee go'aan qaadashada ku saabsan xal waara.

Talo soo jeedin 23: Dawladuhu waa in si firfircoon u bilaabaan wadahadal lala yeelanayo la saaxiibadda caalamiga ah iyo kuwa wadaniga ah iyo deeq bixiyeyaasha ee arrimaha ku saabsan xalalka waara si ay u gutaan waajibaadkooda caalamiga ah.

Talo soo jeedin 24: Dawladaha (iyo daneeyayaasha kale ee khuseyso) waa in ay hubiyaan in heshiis kasta oo nabadda uu ku jiro qodobo gaar ah iyo talooyin ku saabsan wax ka qabashada iyo xallinta xaaladaha jira ee barakacayaasha sida ay ugu baahanyihiin iyada oo la tixgelinaayo caqabadaha xaaladaha guud.

**DANEEYAYAASHA KALE**

Talo soo jeedin 25: Qaramada Midoobay (UN) iyo daneeyayaasha kale caalamiga ah oo wax qaban kara waa in ay gacan ka geystaan kor joogteynta xaaladaha noqoshada, iyadoo si gaar ah loogu fiirsanaayo aragtida walaacyada bulshooyinka barakacayaasha ey khuseyso. Sidoo kale waa in ay ku caawiyaan xaqiijinta dabeecadaha ikhtiyaarka ah oo ammaanka ah ee soo noqoshada iyo xalalka kale ee waara iyo sidoo kale sharaf, ammaan iyo xaalado ku filan barakacayaasha ee meelaha hadda ku sugan yihiin.

# HORDHAC

**Annaga oo ah, Madaxda Wadamadda iyo Xukuumadaha Dawladaha Xubnaha ka ah Midowga Afrika ;**

**ANNAGOO DAREENSAN** xaaladda adag oo ay barakacayaasha guduhu ku jiraan ay tahay sabab sii kordhineeysa xasillooni-darrada iyo qalalaasaha wajaha Dawladaha Afrika;

**SIDOO KALE ANNAGOO DAREENSAN** dhibaatada iyo nuglaanta gaarka ah oo aay qabaan barakacayaasha guduhu;

**MAR KALE KU DHAWAAQEYNAA** caadooyinka Afrikaanka iyo hiddaha soo-dhoweynta bulshooyinka martida loo yahay ay kula dhaqmaan dadka dhibaataysan iyo, sidii loo taageeri lahaa bulshooyinkaas;

**U DIYAAR NAHAY** inaan wadaagno aragtidaan ku midaysanahey ee ah in xal waara loo helo xaaladaha barakacayaasha gudaha, iyada oo la abuuraayo hannaan sharci oo ku habboon dhawristooda iyo u-gargaaristooda;

**WAXAAN GO'AANSANEY** dhaqan-gallinta tallaabooyin looga hortagayo, laguna dhammaynaayo lana soo af-jarayo sababaha asalka ee keenaya xaaladaha barakacayaasha gudaha, gaar ahaan colaadaha soo noqnoqonaya oo joogtada ah, sidoo kalena diyaar u nahay wax-ka-qabadka barakaca ka dhasha masiibooyinka dabiiciga; kuwaasoo iyaguna si ba'an u saameeya nolosha aadanaha, nabaddda, xasilloonida, amniga iyo horumarka;

**TIXGELINEYNA** Xeerka Dastuurka Midowga Afrika ee sannadkii 2000, iyo Axdiga Qarammada Midoobey ee 1945kii;

**DIB-U-XAQIIJINEYNA** mabda'a xushmaynta sinnaanta madax-bannaanida huwan ee Dawladaha Xubnaha ka ah, xurmaynta dhammaansha dhulkooda iyo madax-bannaanidooda siyaasadeed sida ku cad Xeerka Dastuurka Midowga Afrika iyo Axdiga Qarammada Midoobey;

**XUSUUSANAYNAA** Baaqa Caalamiga ah ee Xuquuqda Insaanka (1948dii), Axdiga ka Hor-tagga iyo Ciqaabidda Dembiyada Xasuuqa (1948dii), Afarta Axdiyada Jineefa ee 1949kii iyo  Baratakoolladii lagu darey Axdiyada Jineefa 1977dii, Axdigii Qarammada Midoobey ee Xaaladda Qaxootiga ee 1951gii iyo Baratakoolkii Xaaladda Qaxootiga ee 1967dii, 1969kii Shirkii OAUda ee lagu Maaraynaayey Dhibaatooyinka Quseeya Qaxootiyaasha ku nool Afrika, 1979kii Heshiiskii lagu Cirib-tiraayey Takoor kasta oo lagu hayo Dumarka, 1981gii Axdigii Afrika ee Xuquuqda Insaanka iyo Dadweynaha iyo 2003dii Qodobadii lagu daray Axdiga Afrika kuna saabsanaa Xuquuqda Haweenka Afrika, 1990kii Axdiga Afrika ee Xuquuqda iyo Daryeelka Carruurta, 1994tii Qoraal-rasmiyeedka Addis Ababa ee Qaxootiga iyo Dadka Khasabka lagu Barakiciyey ee ku nool Afrika iyo qodobada la mida ah ee Xuquuqda Insaanka ee ka soo baxay Qarammada Midoobey, Midowga Afrika iyo go'aammada xiriirka la leh ee Golaha Ammaanka laga soo saaray;

**MAANKA KU HAYNAA** in Xubanaha Dowladaha Midowga Afrika ahi ay qaateen ku-dhaqanka  habka dimuqraaddiga ah, una hoggaansan yihiin mabaadi'da takoor la'aanta, sinnaanta iyo sharciga loo siman yahay ee ku xusan Axdiga Afrika 1981gii ee ku saabsanaa Xuquuqda Insaanka iyo Dadweynaha iyo, sidoo kale sida ku cad shuruuc goboleedka  iyo kuwa caalamiga ah ee xuquuqda Insaanka;

**AQOONSANAANAYNAA** xuquuqda asaasiga ah ee barakacayaasha guduhu ay leeyihiin sida uu siinayo, uuna qeexayo Xeerka Caalamiga ee Xuquuqul Insaanka iyo Sharciga Bini'aadanimada iyo sida ku cad Mabaadi'da Barakacayaasha Gudaha ee Qarammada Midoobey ee 1998dii; kuwaas oo loo aqoonsanyahay inay yihiin qaab hannaaneed leeysku raacay oo muhiim u ah dhawrista barakacayaasha gudaha;

**XAQIIJINEYNAA** masuuliyaddaydeena koowaad oo ah tixgalinta, dhawrista iyo meel-marinta xuquuqda ay barakacayaashu mudanyihiin, iyada oo aan lagula kicin wax takoor ah;

**OGSOON** kaalimaha gaarka ah ee Hay'adaha Caalamiga ah iyo wakaaladaha kale ee habraaca hannaanka Qarammada Midoobey oo wada-shaqaynta ka dhexaysaa ay quseeyso barakacayaasha gudaha, gaar ahaan khubaradda dhawrista ee Xafiiska Gudiga Sare ee Qarammada Midoobey u Qaabilsan Qaxootiga (UNHCR) iyo taageeraddii xafiiskaasi ka helay Golaha Gudiga Sare ee Midowga Afrika, kuna xusan Go'aanka summaddiisu tahay EX/CL.413 (XIII), kana soo baxay shirkii Sharm El Sheikh (Masar) ee Luulyo 2008dii, si loo joogteeyo loona sii xoojiyo kaalinta xafiiskaas ka shaqeeya dhawrista iyo u-gargaaridda barakacayaasha gudaha, iyada oo lagu hawl-gelaayo hannaanka isku-dubbaridka ee Qarammada Midoobey; annaga oo haddana garawsan xilka iyo waajibaadka loo igmadey Guddiga Caalamiga ah ee Laanqayrta Cas, kuna saabsan dhawrista iyo u-gargaaridda dhibanayaasha colaadaha hubaysan iyo xaaladaha kale ee qalalaase iyo, sidoo kale, shaqada ururrada bulshada rayidka; iyada oo la waafajinaayo xeerarka dalka ay ku gudanayaan kaalintaas iyo waajibaadka saaran;

**XUSUUSANAYNAA** inuusan jirin hanaan-sharciyeed iyo hanaan Afrikaan ah ama caalami ah oo khasab ka dhigaya ka hortagidda barakacayaasha gudaha iyo dhawrista iyo u-gargaaridda barakacayaasha gudaha;

**DIB-U-XAQIININAYNAA** waajibka taariikhiga ah ee Dawladaha Midowga Afrika Xubnaha ka ah ka saaran ilaalinta iyo u-kaalmeeynta qaxootiga iyo barakacayaasha iyo, gaar ahaan, meel-marinta Go'aannadii Golaha Gudiga Sare ee summaddoodu ahayd EX.CL/Dec.129 (V) iyo EX.CL/127 (V) ee Addis Ababa lagu gaarey Luulyo 2004tii; kuwaas oo dulucdoodu ahayd in lala shaqeeyo dhamaan haya'daha iyo musuuliyiinta ay quseesyo lana sameeyo qaab sharciyeed lagu xaqiijinaayo ilaalinta iyo kaalmeeynta barakacayaasha iyo in arrintooda xal waara laga gaaro;

**AAMINSANAHAY** in Axdiga Dhowrista iyo U-gargaarka Barakacayaasha Gudaha uu yahay qaab sharciyeed sal-dhig u ah;

## WAXAAN KU HESHIINEY SIDA SOO SOCOTA:

### QODOBKA 1AAD
### QEEXID

Ereyada Heshiiskaan dhexdiisa ku xusan waxaa loola jeedaa:

a. "Axdiga Afrika" waxaa loola jeedaa Axdiga Afrika ee Xaquuqul Insaanka iyo Dadweynaha;

b. "Guddiga Afrika" waxaa loola jeedaa Guddiga Afrika ee u qaabilsan Xuquuqda Insaanka iyo Dadweynaha;

c. "Maxkamadda Afrika ee Caddaaladda iyo Xuquuqul Insaanka" waxaa loola jeedaa Maxkamadda Afrika ee Caddaaladda iyo Xuquuqda Aadanaha;

d. "Barakicin aan sharci ahayn" waxaa loola jeedaa barakicinta aan sharciga ahayn ee ku xusan Qodobka 4 (4) (a) ilaa (h);

e. "Kooxaha Hubaysan" waxaa loola jeedaa ciidammada hubaysan ee mucaaradka ah ama kooxaha kale ee hubaysan ee fallaagada ah, kuwaas oo ka duwan ciidammada dawladda;

f. "MA" waxaa loola jeedaa Midowga Afrika;

g. "Guddiga Midowga Afrika" waxaa loola jeedaa Xoghaynta Midowga Afrika oo ah halka shuruuc-goboleedka rasmiga ah lagu kaydiyo;

h. "Ilmo" waxaa loola jeedaa qof/aadane kasta oo 18 sano ka yar;

i. "Sharciga Asaaska" waxaa loola jeedaa Sharciga Asaaska Midowga Afrika;

j. "Falal Dhibaato Geysta" waxaa loola jeedaa dhammaan dhaqamadda, arragtida iyo falalka sida xun u saameeya xuquuqda asaasiga ah ee dadka sida xaqa nolosha, caafimaadka, sharafta, waxbarashada iyo qalbiga iyo jirka, in kastoo intaas keliya aysan ku koobnayn;

k. "Barakacayaasha Gudaha" waxaa loola jeedaa dadka ama kooxaha lagu qasbay amaba lagu dirqiyey inay ka barakacaan ama ka tagaan guryahoodii ama deegaanaddii ay degi jireen, qaasatan markii ay ka dhalato baxsad laga cararaayo saamaynta colaad hubaysan, xaaladaha qalalaaso guud, xadgudubyada ka dhan ka ah xuquuqul insaanka ama musiibooyinka dabiiciga ama kuwa beni-aadanku sababey, barakacayaashaas oo aan weli ka gudbin xuduudka caalamiga ah ee wadankoodii loo aqoonsan yahay;

l. "Barakaca Gudaha" waxaa loola jeedaa rarid aan raali laga ahayn ama lagu khasbay, barakicin ama dib-u-dejin meel kale oo dadka ama kooxo loo raro meel kale oo soohdimaha dalka aan ka baxsanayn;

m. "Dawlad Xubin ah" waxaa loola jeedaa Dawlad Xubin ka ah Midowga Afrika;

n. "Ururrada aan Dawliga ahayn" waxaa loola jeedaa dhinacyada gaar ahaantooda u hawl-gala oo aan ka tirsanayn saraakiisha Dawladda; kuwaas oo ay ku jiraan kooxaha hubaysan oo aan lagu xusin qodobka 1 (d) ee kor ku xusan iyo kuwa falalkooda aan si rasmi ah Dawladda loogu aanayn karin;

o. "UMA" waxaa loola jeedaa Ururka Midaynta Afrika;

p. "Haween" waxaa loola jeedaa Aadanaha dheddigga ah oo gabdhuhu ka mid yihiin;

q. "Hannaan qiimayn" waxaa loola jeedaa qiyaasta la isku raacsan yahay ee ku saabsan dabaggalka iyo qiimaynta wax-qabadka iyo saamaynta kaalmada Aadaminnimo; iyo

r. "Dawladaha Xubnaha ah" waxaa loola jeedaa Dawladaha Afrikaanka ee heshiiskaan ansaxiyey amaba qalinka ku duugey.

**QODOBKA 2AAD**
**UJEEDDOOYINKA**

Ujeeddooyinka heshiiskaan laga leeyahay waxay yihiin:

a) In kor-loo qaado, lana xoojiyo tallaabooyinka heer gobol iyo heer qaran kuwaas oo looga hortagayo ama lagu yaraynayo, lagu mamnuucayo, laguna soo af-jarayo sababaha dhabta ah ee barakaca gudaha dhaliya iyo, sidoo kale, in xal waara loo helo;

b) In la abuuro hannaan-sharciyeed oo lagaga hor-tegayo barakaca gudaha, isla markaasna lagu ilaalinaayo luguna gargaarayo barakacayaasha gudaha ee Afrika ku sugan;

c) In la abuuro hannaan-sharciyeed lagu mideysanyahay, la iska kaashado si kor loogu qaado xal waara oo loo helo barakaca, iyo ishkaashi ka dhaxeeya Dawladaha Xubnaha ah si loola dagaalamo barakaca, dhibaatoyinka ka dhalanyana wax looga qabto;

d) In la meel-mariyo waajibaadka iyo masuuliyadaha saaran Dawladaha Xubnaha ah; kuwaas oo ku saabsan ka-hortagga barakaca gudaha, dhawrista iyo u-gargaarida barakacayaasha gudaha;

e) In la meel-mariyo waajibaadka, masuuliyadaha iyo doorarka kooxaha hubaysan, ururada aan dawliga ahayn iyo asxaabaheey quseeyso, oo ay ka midyihiin ururada bulshada rayidka; si looga hortago arrimaha keena barakaca gudaha, lana ixtiraamo dhawrista iyo u-gargaarida barakacayaasha gudaha.

**QODOBKA 3AAD**
**WAAJIBAAD GUUD EE DAWLADAHA XUBNAHA AH**

1. Dawladaha Xubnaha ah waa iney tixgaliyaan isla markaana hubiyaan xushmeynta xeerkaan. Gaar ahaan Dawladaha Xubnaha ah waa:

    a. Inaysan ku kicin, isla markaasna mamnuucaan kana hortagaan barakaca sharci darada ah ee bulshada;
    b. Inay ka hor-tagaan faquuq siyaasadeed, mid bulsho, dhaqan iyo mid dhaqaale kaas oo dadka qaar lagu takooraayo; kuwaaas oo laga yaabo iney sabab u noqdaan barakaca dadweynaha ama shakhsiyaad; iyada oo loo cuskanaayo abtiriskooda bulsho, diineed ama fikradaha siyaasadeed ee ay rumaysan yihiin;
    c. Inay tixgaliyaan isla markaana hubiyaan xushmeynta mabaadi'da aadannimo iyo sharafta aadaminimo ee barakacayaasha gudaha ay mudanyihiin;
    d. Inay tixgaliyaan isla markaana hubiyaan xushmeynta ilaalinta xuquuqda aadanaha ee barakacayaasha gudaha, xuquuqdaas oo aay ka mid tahay in loola

dhaqmo si aadannimo leh, takoorid la'aan, sinnaan iyo dhawris sharci oo loo siman yahay;

e. Inay tixgaliyaan isla markaana hubiyaan xushmeynta xeerka caalamiga ah ee aadannimada, kuna saabsan ilaalinta barakacayaasha gudaha;
f. Inay tixgaliyaan isla markaana hubiyaan ixtiraamka beni-aadannimada iyo midda rayadnimo iyo ilaalinta iyo u-gargaarka ee ay barakacayaasha guduhu leeyihiin; kuwaas oo ay ka mid tahay in dadka caynkaan ahi aysan ku kicin falal kharbudaad ah;
g. Inay hubiyaan in qofkii falal barakicin sharci dara ah sameeya lagu qaadi doono xeer-ciqaabeedka wadaniga ah iyo kan caalamiga ah.
h. Inay hubiyaan la-xisaabtanka ururrada aan dawliga ahayn ee hawlahaan ku lugta leh, kuwaas oo aay ka mid yihiin shirkadaha jinsiyadaha kala duwan ku midaysan, shirkadaha nabad-galyada ee gaarka loo leeyahay, in lagula xisaabtamo barakicinta aan sharciga waafaqsanayn amaba ka-qayb-qaadashada falalkaas;
i. Inay hubiyaan la-xisaabtanka ururrada aan dawliga ahayn ee ku lug-yeesha baarista iyo ka-faa'ideysgia dhaqaale ama kheyraadka dabiiciga ah oo barakaca abuura;
j. Inay hubiyaan u-gargaaridda barakacayaasha gudaha; iyada oo la daboolayo baahidooda asaasiga ah, isla markaasna hay'adaha beni-aadannimada iyo shaqaalahooda si degdeg ah oo carqalad la'aan loogu oggolaado loona fududeeyo sidii aay dadkaas ku gaari lahaayeen;
k. Inay barakacayaasha gudaha dhexdooda ka dhiirri-geliyaan mabda'a isku-fillaanshaha iyo nolol waarta; waxaase shardi ah inaan taas darteed looga tegin ilaalinta iyo u-kaalmaynta barakacayaasha gudaha; iyada oo taasna aan wax lagu yeelayn hababka kale ee gargaar-bixinta.

2. Dawladaha Xubnaha ahi waa:

a. Inay waajibaadka uu Heshiiskani faraayo ku daraan xeerarkooda gudaha, iyaga oo sharci ku ansixinaaya ama wax ka baddalaaya shuruucda xiriirka la leh ee ku saabsan ilaalinta iyo u-gargaarka barakacayaasha gudaha; taas oo waafaqsan waajibaadka xeerka caalamiga ahi uu saaraayo;
b. Markii loo baahdo, inay magacaabaan xafiis ama hey'ad rasmi ah oo masuul ka noqota isku-dubbaridka hawlaha ku saabsan ilaalinta iyo u-gargaarka barakacayaasha gudaha iyo laamaha ku habboon in loo xil-saaro masuuliyadaha dhawrista iyo u-gargaarka, iyo inay iskaashi la yeeshaan ururada caaalamiga ah ama hay'adaha aay arrintaani quseeyso iyo ururrada bulshada rayidka ah, haddii aaysan ka jirin xafiis ama hay'ad rasmi ah;
c. Inay dajiyaan tallaabooyin kale ee ku habboon; kuwaas oo ay ka mid yihiin istaraatiijiyadaha iyo siyaasadaha ku saabsan barakacayaasha gudaha heer qaran iyo heer deegaan labadaba, iyada oo maanka lagu hayo baahida bulshooyinka martida loo yahay ay qabaan;
d. Inay bixiyaan, intii ay awoodi karaan, kharashaadka lagama-maarmaanka u ah dhawrista iyo gargaarka; iyada oo aan wax loogu dhibeyn oggolaanshaha taageerada caalamiga ah;
e. Inay ku dadaalaan iney ku darsadaan wada-hadaladda nabadda iyo heshiisyada xal-waara loogu raadinayo dhibaatooyinka barakaca gudaha, mabaadi'da xeerkan ku jirta wixii quseeya.

## QODOBKA 4AAD
## WAAJIBAADKA DAWLADAHA XUBNAHA AH EE ILAALINTA BARAKACA GUDAHA

1. Dawladaha Xubnaha ahi waa inay tixgaliyaan, isla markaasna hubiyaan in la

xushmeeyo waajibaadka uu xeerkani faraayo; kuwaas oo xuquuqda aadanaha iyo xeerka beni-aadannnimadu ay ka mid yihiin, si looga hor-tago loogana fogaado xaaladaha keeni kara in dadka si sharci daro ah lagu barikiciyo;

2. Dawladaha Xubnaha ahi waa inay sameeyaan hab digniin hore looga heli karo meelaha ay suuragal ka tahay in barakac uu ka dhaco; taas oo mid ah hababka digniinta hore ee heer qaaradeed, waa inay salka u dhigaan, isla markaasna ay fuliyaan qaab habeeysan oo lagu dhimaayo dhibaatooyinka halista ah, diyaarna aay ugu ahaadaan siday ugu gurman lahaayeen xaaladaha degdegga ee halista ah, ayna si deg deg ah u ilaaliyaan una gargaaraan barakacayaasha gudaha;

3. Dawladaha Xubnaha ahi waxay codsan karaan iskaashiga ururrada caalamiga ah ama hay'adaha arrimaha beni-aadannnimada, ururrada bulshada rayadka ah iyo masuuliyiinta aay quseeyso;

4. Qof waliba wuxuu xaq u leeyahay in laga ilaaliyo barakaca aan sharciga ahayn. In kastoo aanay intaan ku koobneyn, haddana qaybaha barakaca maamnuuca ah waxaa ka mid ah:

    a. Barakaca ku salaysan siyaasadaha isir-takoorka ama dhaqamadda kale ee la midka ah kuwaas oo keeni kara isbaddel sinjiyeed, mid diineed iyo mid isireed oo dhismaha dadweynaha rayadka saamayn ku yeesha;
    b. Qof ama dad badan oo aay xaalad colaadi barakicisay, aan ka aheeyn markii barakacaani uu yahay mid amniga dadkaasi lagu illaalinaayo ama aanay jirin sababo xoog-ciidamo oo lagama-maarmaan ah, sida ku xusan xeerka aadannimo ee caalamiga ah;
    c. Barakac si ulakac loo sameeyay iyadoo la adeegsanayo hab dagaal ama ka dhasha xadgudubyo kale ee xilliyada colaadaha hubaysan oo saameeya xeerka aadannimo ee caalamiga ah;
    d. Barakac ka dhasha xad-gudub wadareed ama xadgudubyada xuquuqda aadannaha;
    e. Barakac ka dhasha ka carar dhaqamada weaxyeelada leh;
    f. Barakicinta qasabka ah ee dhacda xilliyada musiibooyinka dabiiciga ah ama kuwa aadannuhu sababo, haddii barakicintaasi aysan lagama-maarmaan u ahayn bedbaadada iyo caafimaadka dadka ay arrintu saamaynayso;
    g. Barakicin ciqaab-wadareed ahaan loo adeegsado;
    h. Barakicin ka timaadda fal, dhacdo, sabab iyo xaalad u dhiganta inta kor ku xusan oo idil, taas oo aan marmarsiinyo looga heli karin xeerarka caalamiga ah oo ay ka mid yihiin xuquuqda aadannaha iyo xeerka aadannimo ee caalamiga ah.

5. Dawladaha Xubnaha ahi waa inay ku dadaalaan siday barakaca uga ilaalin lahaayeen bulshooyinka, iyadoo la ixtiraamaayo dhaqanka iyo tirsanaanta gaarka ooy dadku ku leeyihiin dhulkooda, haddii aysan jirin dano guud oo barakicintaas lagama-maarmaan ka dhigaaya;

6. Dawladaha Xubnaha ahi waa inay si sharci cadaan ah u daabacaan in fal kasta oo ah barakicin aan sharci ahayn oo u dhiganta xasuuq, dembiyo dagaal ama dembiyo aadannimada ka dhan ah aay yihiin dembiyo lagu mudan karo ciqaab adag .

## QODOBKA 5AAD
## WAAJIBAADKA DAWLADAHA XUBNAHA AH KAGA AADDAN ILAALINTA IYO GARGAARKA

1. Dawladaha Xubnaha ah waa inay dusha u ritaan waajibka iyo masuuliyadda ugu weyn ee ah in dhawris iyo kaalmo aadannimo loo fidiyo barakacayaasha gudaha ee

dalkooda ku sugan ama inta ay sharci ahaan maamulaan, iyada oo wax takoor ah aan lagula kicin.

2. Dawladaha Xubnaha ah waa inay is kaashadaan marka Dawlad iyaga ka mid ahi ama Shirka Dawladaha Xubnaha ay weyddiistaan dhawrista iyo gargaarista barakacayaasha gudaha.

3. Dawladaha Xubnaha ah waa inay xushmeeyaan waajibaadka loo igmadey Midowga Afrika iyo Qarammada Midoobey, sidoo kalena ay xurmeeyaan kaalimaha ururrada caalamiga ah ee aadannimo, marka loo fidinayo barakacayaasha gudaha dhawris iyo gargaar waafaqsan xeerarka caalamiga ah.

4. Dawladaha Xubnaha ahi waa inay qaadaan tallaabooyin ay ku dhawrayaan, uguna gargaarayaan dadka gudaha dalalkooda lagu barakiciyo; barakacaas oo ka dhasha masuubooyin dabiiciya ah ama ah kuwo beni-aadam sababey, ooy ku jirto isbaddalka cimilada.

5. Dawladaha Xubnaha ah waa inay qiimeeyaan amaba ay fududeeyaan qiimaynta baahida iyo nuglaanshaha barakacayaasha gudaha iyo, sidoo kale, bulshooyinka marti-geliya, iyadoo la kaashanayo ururrada caalamiga ah ama hay'adaha.

6. Dawladaha Xubnaha ah waa inay dhawris iyo gargaar ku filan barakacayaasha gudaha u fidiyaan, halkii aan la heli karin khayraad ku haboon oo u suurtagalinayo iney fuliyaan, waa inay iskaashi kala yeeshaan sidii kaalmo looga raadin lahaa ururrada caalamiga ah, iyo hay'adaha beni-aadnimada, ururrada bulshada rayadka ah iyo dhinacyada kale ee arrimahaas ku lugta leh. Waxaa suuraggal ah ururradaas oo kale in ay gargaar ugu deeqaan dhammaan inta u baahan.

7. Dawladaha Xubnaha ahi waa inay qaadaan tallaabooyinka lagama-maarmaanka u ah sidii ay si wax-ku-ool ah ugu abaabuli lahaayeen kaalmo aadannimo, dabeecad dhexdhexaad leh, isla markaasna amniga damaanad-qaada. Dawladaha Xubnaha ahi waa inay oggolaadaan si degdeg ah oo aan is-hortaag lahayna u fududeeyaan in gargaarka oo idili uu gaaro barakacyaasha gudaha, sidaas si le'egna qalabka iyo hawl-wadeennada hay'adaha. Dawladaha Xubnaha ahi waa inay awood-siiyaan, isla markaasna ay fududeeyaan kaalinta maxalliga ah iyo midda ururrada caalamiga ah, hay'adaha beni-aadannimada, ururrada bulshada rayadka ah iyo mas'uuliyiinta arrimahaan ku lugta leh, si barakacayaasha gudaha ugu deeqaan dhawris iyo gargaar. Dawladaha Xubnaha ka ahi waxay xaq u leeyihiin inay bixiyaan tilmaamo xagga farsamada ah sida oggolaanshaha dadkaas loogu gaari karo.

8. Dawladaha Xubnaha ahi waa inay taageeraan, isla markaasna ay hubiyaan xushmaynta mabaadi'da aadanimada, dhexdhexaadnimada, eexasho la'aanta iyo madaxbannaanida hawl-wadeenada hay'adaha beni-aadnimada.

9. Dawladaha Xubnaha ahi waa inay xushmeeyaan barakacayaasha guduhu xaqa ay leeyihiin inay si nabad ah ku weydiistaan amaba u raadsadaan dhawris iyo gargaar, si waafaqsan xeerarka heer qaran iyo kuwa caalamiga ah, doonista xaqaas oo aan lagu dhibaateyn, lagu dacweyn karin, aanna lagu ciqaabi karin.

10. Dawladaha Xubnaha ahi waa inay xushmeeyaan, ilaaliyaan, isla markaasna aysan weerarin ama waxyeellayn shaqaalaha hawlaha beni-aadannimada, hantida ama qalabka kale ee loo keenay gargaarka iyo u-faa'ideynta barakacayaasha gudaha.

11. Dawladaha Xubnaha ahi waa inay qaadaan tallaabooyin lagu hubinaayo kooxaha hubaysani inay u hawl-galaan si waafaqsan waajibaadkooda ku xusan Qodobka 7aad.

12. Arrimaha Qodobkaan ku xusani sina ugama hor'imaan karaan mabaadi'da madaxbannaanida iyo dhammaanshaha dhuleed ee Dawladaha.

## QODOBKA 6AAD
## WAAJIBAADKA URURRADA CAALAMIGA IYO HAY'ADAHA BENI-AADANNIMADA SAARAN

1. Ururrada caalamiga ah iyo hay'adaha beni-aadannimadu waa inay meel-mariyaan waajibaadka uu Heshiiskani dhigayo, taas oo waafaqsan xeerka caalamiga ah iyo xeerarka wadanka ay ka hawl-galayaan.

2. Si dhawris iyo gargaarba loogu fidiyo barakacayaasha gudaha, ururrada caalamiga ah iyo hay'adaha beni-aadannimadu waa inay ilaaliyaan xuquuqda dadka caynkaas ah, taas oo waafaqsan xeerarka caalamiga.

3. Ururrada caalamiga ah iyo hay'adaha beni-aadannimadu waa inay u hoggaansamaan mabaadi'da aadannimo, dhexdhexaadnimo, eexasho la'aan iyo madaxbannaanida hawl-wadeennadooda, waana inay hubiyaan xushmaynta xeerarka caalamiga ah ee arrintan xiriirka la leh iyo, sidoo kale, xeerarka anshaxa (codes of conduct).

## QODOBKA 7AAD
## DHAWRISTA IYO U-GARGAARKA BARAKACAYAASHA GUDAHA XILLIYADA COLAADAHA HUBAYSAN

1. Arrimaha Qodobkaan ku xusan waa inaan, sinaba, loogu fasiran in kooxaha hubaysan ay sharciyad yihiin ama ay sharciyaynayaan ama ay aqoonsanayaan, isla markaasna xubnaha kooxahaas ma laga cafinaayo masuuliyadaha, shakhsi ahaanta, ee dembiyada loo galo ee ciqaabta looga mudan karo xeer-ciqaabeedka wadaniga ama midka caalamiga ah.

2. Qodobadda xeerkaan ku xusan looma adeegsan karo in wax loogu dhimo madaxbannaani dawladeed ama masuuliyad Xukuumadeed, iyada oo loo marayo hab kasta oo sharci ah, adkeynta ama dib-u-soo celinta sharciga iyo kala dameynta wadanka, ama difaacidda midnamadda qaran iyo dhamaanshaha dhuleed ee wadanka.

3. Dhawrista iyo u-gargaarka uu qodobkani siinayo barakacayaasha gudaha waxaa nidaamiya xeerarka caalamiga ah gaar ahaan, xeerka caalamiga ah ee beni-aadannimada.

4. Xubnaha Kooxaha Hubaysan waa in lagula xisaabtama falalkooda qaldan; kuwaas oo ku xad-gudba xuquuqda barakacayaasha gudaha, lana saaraa ciqaab waafaqsan xeerka caalamiga iyo midka wadaniga ah.

5. Xubnaha kooxaha hubaysan waa in laga mamnuucaa:

    a. Inay fuliyaan barakaca aan sharci ahayn;
    b. Inay marnaba hor-joogsadaan ama carqaladeeyaan bixinta dhawrista iyo u-gargaarista dadka barakacayaasha gudaha;

c. Inay dadka barakacayaasha gudaha u diidaan xaqa ay u leeyihiin inay ku noolaadaan nolol lagu qanci karo, sharaf, amni, fayo-dhawr, cunto, biyo, caafimaad, hoy; iyo iney kala kaxeeyaan xubnaha qoyska;
d. Inay xayiraan xorriyadda dhaqdhaqaaqa dadka barakacayaasha gudaha, xayiraaddaasi ha ahaato meesha ay markaas deggan yihiin iyo meel ka baxsan labadaba;
e. In xaalad kasta ha lagu jiree ay qortaan ama ay raadsadaan amaba ay oggolaadaan in colaadaha hubaysan ay carruurtu ka qayb-qaadato;
f. Inay si qasab ah dad u qortaan ama u afduubtaan ama ay qafaashaan ama haystaan, si loogula kaco addoonsi galmo ama ay dadka ka ganacsadaan, gaar ahaan haweenka iyo carruurta;
g. Inay hor-joogsadaan gargaarka aadannimo iyo gudbidda dhammaan kaalmada loo wado, qalabka iyo hawlwadeennada u adeegaya barakacayaasha gudaha;
h. Inay weeraraan ama si kaleba ay waxyeello ugu geystaan hawlwadeennada hay'adaha iyo hantida ama alaabta loogu talo-galay gargaarka ama barakacayaasha gudaha ay faa'ido ugu jirto, waana inaysan burburin ama la wareegin ama leexsan alaabta caynkaas ah; iyo
i. Inay ku xad-gudbaan dabeecadda rayadnimo iyo midda aadannimo ee meelaha barakacayaasha gudaha la dejiyo, waana inaysan ku soo dhex-dhuuman meelahaas.

## QODOBKA 8AAD
## WAAJIBAADKA MIDOWGA AFRIKA

1. Midowga Afrika wuxuu xaq u leeyahay in Dawlad Xubin ka ah uu faro-geliyo, taas oo waafaqsan go'aanka Shirweynaha Guud lagu gaarey oo ku xusan Qodobka 4d xarafka (h) ee Sharciga Asaaskiisa, kaas oo ku saabsan xaaladaha culus, sida: dembiyada dagaalka, xasuuqa iyo dembiyada ka dhanka ah aadanimadda;

2. Midowga Afrika waa inuu tixgeliyaa Dawladaha Xubnaha ah xaqa ay u leeyihiin inay Ururka faro-gelin weydiistaan si nabadda iyo amniga dib loogu soo celiyo, taas oo waafaqsan Qodobka 4d xarafka (j) ee Sharciga Asaaskiisa, sidaasna uu kaga qayb-qaato abuurista jawi ku haboon sidii xal waara loogu heli lahaa dhibaatada barakaca gudaha;

3. Midowga Afrika waa inuu taageeraa Dawladaha Xubnaha ahi, iyaga oo Xeerkan raacaaya, dadaallada ay ugu jiraan dhawrista iyo u-gargaarista barkacayaasha gudaha. Si gaar ah, waa inuu Midowgu:

    a. Xoojiyaa qaabka hay'adnimo iyo awoodda Midowga Afrika ee ku aadan dhawrista iyo u-gargaarka barakacayaasha gudaha;
    b. Isku dubbaridaa abaabulka sidii loo heli lahaa hanti/dhaqaale loo adeegsado ilaalinta iyo u-gargaarka barakacayaasha gudaha;
    c. Iskaashi ula yeeshaa ururrada caalamiga ah iyo hay'adaha aadannimada, ururada bulshada rayadka ah iyo dhinacyada kale ee arrintaan xiriirka la leh, si waafaqsan waajibaadkooda shaqo ee taageerista tallaabooyinka Dawladaha Xubnaha ahi ku ilaalinayaan, kuna gargaarayaan barakacayaasha gudaha;
    d. Si toos ah ula shaqeeyaa Dawladaha Afrika, urarrada caalamiga ah, hay'adaha aadannimada, ururrada bulshada rayadka ah iyo dhinacyada kale ee arrintaan xiriirka la leh, si loo qaado tallaabooyinka ku habboon ee loo baahan yahay si loo ilaaliyo looguna gargaaro barakacayaasha gudaha;
    e. Xogta la wadaago Guddiga Afrika ee Xuquuqda Aadanaha iyo Dadweynaha marka xaalad barakac ah ay jirto iyo dhawrista iyo gargaaridda barakacayaasha gudaha Afrika; iyo

f. Iskaashi la yeesho Ergeyga Gaarka ah ee Guddiga Afrika Xuquuqda Aadanaha iyo Dadweynaha u qaabilsan Qaxootiga, Soo-noqdayaasha, Barakacayaasha Gudaha iyo Magangelyo-doonka si wax looga qabto arrimaha barakacayaasha gudaha.

## QODOBKA 9AAD
## WAAJIBAADKA DAWLADAHA XUBNAHA AH KA SARAN DHAWRISTA IYO GARGAARKA XILLIGA BARAKACA GUDAHA

1. Dawladaha Xubnaha ah waa inay dhawraan xuquuqda barakacayaasha gudaha, iyadoon la eegayn sababta keentay barakaca, iyada oo laga fogaanayo, isla markaasna la hor-joogsanaayo falalka ay ka midka yihiin:

   a. Takoor lagu haayo dadka noocaana iyadoo loogu marmarsoonaayo iney yihiin dad barakacayaal ah kaasoo waxyeelaya xuquuqdooda iyo xorriyadahooda guud;
   b. Xasuuq, dembiyada aadannaha lidka ku ah, dembiyada dagaalka iyo xadgudubyada kale ee ka dhanka ah xeerarka caalamiga ah ee aadannimadda ee lagula kaco barakacayaasha;
   c. Dilka aan sharciga ahayn, gumaadka degdegga ah (oon maxkamad loo marin), xarigga sharci darrada ah, afduubka, qarinta qasabka ah, jir-dilka iyo in lagula dhaqmo nooc kasta oo falal naxariis-darro ah, beni-aadannimo ahayn, bahdilaada iyo ciqaabta;
   d. Xoogis iyo nooc kasta oo ka mid ah tacadiyadda ka dhan ka ah haweenka, gaar ahaan kufsiga, dhillaysiga qasabka ah (enforced prostitution), ka ganacsiga galmada iyo falalka qofka dhibaatada leh, adoonsiga, shaqaaleyta carruurta iyo colaadaha loo adeegsado, shaqada khasabka ah, ka-ganacsiga dadka iyo tahriibintooda; iyo
   e. Cuno-qabateen, raashinkoo laga xayiro (Gaajeysiinta).

2. Dawladaha Xubnaha ah waa iney:

   a. Qaadaan tallaabooyin lagama-maarmaan u ah sidii loo hubin lahaa, in lagu soo dhoweeyo dadka barakacayaasha gudaha si kala sooc la'aan ah nooc kastaba, iyo iney ku noolaadaan xaalad nadad ah oo lagu qanco, sharaf iyo amni;
   b. Waa inay si dhab ah oo aan daahid lahayn barakacayaasha gudaha u siiyaan gargaar beni-aadannimo ay ka mid yihiin cunto, biyo, hooy, daryeel-caafimaad, adeegyada kale ee caafimaadka, nadaafad, waxbarasho, iyo adeeg bulsheed kastoo kale, hadana hadeey suuragal tahay, in gargaarkaas la gaarsiiyo bulshooyinka degaanka iyo kuwa martida loo yahay;
   c. In dhawris iyo gargaar gaar ah ay u fidiyaan barakacayaasha gudaha ee qaba baahiyaha u gaarka ah, kuwaas oo ay ka mid yihiin carruurta ehelkoodi ka dhumey iyo kuwa aan ehelkoodu wehelin, dumarka qoyskooda madaxda u ah, hooyooyinka uurka leh, hooyooyinka dhallaanka wata, waayeelka iyo dadka naafada ah iyo kuwa qaba cudurrada la faafa;
   d. Waa inay qaadaan tallaabooyin gaar ah oo lagu dhawrayo laguna fidinayo caafimaadka taranka ee haweenka barakacayaasha gudaha iyo in taageero nafsi-bulshadeed ay u fidiyaan dhibbaneyaasha la xoogay (kufsasho) iyo xadgudubyada la jaadka ah;
   e. Waa inay xushmeeyaan, isla markaasna ay hubiyaan dhaqan-galka xaqa ay dadku u leeyihiin iney nabad-galyo darted ugu kacaan meel kale oo dalka tirsan, iyo in laga ilaaliyo in si khasab ah dib loogu celiyo ama dib-u-dejin loogu sameeyo meel noloshooda, nabad-galyadooda, xorriyadooda ama caafimaadkoodu uu halis geli karo;

f. Waa inay damaanad-qaadaan xorriyadda dhaqdhaqaaqa iyo doorashada hoyga ee barakacayaasha gudaha, laga soo reebo markii xadidaas aay laga maarmaan tahay, la aqbali karo, una dhiganta baahidda sugidda amniga barakacayaasha gudaha ama sugidda amniga guud, kala dameynta iyo caafimaadka guud;
g. Waa inay xushmeeyaan oo ilaaliyaan dabeecadda rayadnimo iyo midda aadannimo ee meelaha barakacayaasha gudaha la dejiyo, waana in meelahaas oo kale laga hor-joogsadaa in kooxo ama canaasir hubaysani ku soo dhex dhuuntaan, isla markaasna waa inay sameeyaan hub ka dhigis iyo in laga sooco barakacayaasha gudaha kooxahaas iyo canaasirta hubeysan;
h. Waa inay qaadaan tallaabooyin lagama-maarmaan u ah abuurista habab gaar ah oo lagu baadi-goobayo laguna mideeynayo qoysaska waqtiga barakaca kala lumay iyo inay fududeeyaan sidii loo xiriirin lahaa qoysaskaas;
i. Waa inay qaadaan tallaabooyin lagama-maarmaan u ah ilaalinta hantida shakhsiga ah, midda guud ahaaneed iyo tan dhaqanka ee barakacayaashu ay ka soo carareen iyo, sidoo kale, ilaalinta meelaha barakacayaasha gudaha la dejiyey, meelahaas oo awoodda sharciyeed ee Dawladaha Xubnaha ah hoos-yimaada, amaba ay si dhab ah ay iyagu uga taliyaan;
j. Waa inay qaadaan tallaabooyin lagama-maarmaan u ah sidii xaalufka degaanka looga ilaalin lahaa meelaha barakacayaasha gudaha la dejiyo, meelahaasi ha ahaadeen kuwo, sharci ahaan, hoos-yimaada Dawladaha Xubnaha ah ama meel ay si dhab ah ay iyagu uga taliyaan;
k. Dawladaha Xubnaha ahi waa inay barakacayaasha gudaha kala tashadaan, una oggolaadaan inay qayb ku yeeshaan go'aammada saameeya dhawristooda iyo u-gargaaridooda;
l. Waa inay qaadaan tallaabooyin lagama-maarmaan u ah sidii loo xaqiijin lahaa barakacayaasha gudaha ee dalka u dhashey oo muwaaddiin ka ahi inay ku naalloodaan xuquuqdooda madaniga ah iyo tan siyaasadeed, gaar ahaan ka qayb-galka siyaasadda, xaqa codeynta iyo in loo dooran karo xafiiska ama jago qaran; iyo
m. Inay meel mariyaan tallaabooyin lagula soconaayo, laguna qiimaynaayo waxtarnimada iyo saamaynta gargaarka aadannimo ee la siiyo barakacayaasha gudaha, taas oo waafaqsan hannaanka qiimaynta ee la isku raacsan yahay (sphere standards).

3. Intey suuragal tahay, Dawladdaha Xubnaha ah waa iney fuliyaan waajibaadkaas, iyagoo la kaashanaya ururrada caalamiga ah, hay'adaha beni-aadannimo, ururrada bulshada rayadka ah iyo jaalayaasha (masuuliyiinta) kale ee ay arrintaani khusayso.

## QODOBKA 10AAD
## BARAKACA AY MASHAARIICDU SABABTO

1. Dawladaha Xubnaha ahi waa inay, intii suuraggal ah, ka hor-tagaan barakaca ka dhasha mashaariicda dawladda ay fulineeyso ama kuwa shirkadaha gaarka ahi aay fulinayaan;

2. Dawladaha Xubnaha ahi waa inay hubiyaan daneeyeyaasha (shirkadaha) arrimahan ku lugta lihi inay u raadiyaan mashruucyadaas xalal kale oo macquul ah oo lagu baddalan karo, iyada oo lala wadaagayo xog dhamaystiran lanana tashanayo dadka la maleyanyo in mashaariicdaasi barakiciyaan;

3. Dawladaha Xubnaha ahi waa inay sameeyaan qiimayn ku aaddan saamaynta dhaqan-dhaqaale iyo midda degaaneed ee mashruuca horumarineed uu keeni karo, ka hor intaan fulintiisa lagu dhaqaaqin.

## QODOBKA 11AAD
## WAAJIBAADKA DAWLADAHA XUBNAHA AH KA SAARAN DIB-U-NOQOSHADA LA ISKU-HALLAYN KARO, DHEX-GALKA BULSHADA DEGAANKA AH AMA DIB-U-DEJINTA BARAKACAYAASHA.

1. Dawladaha Xubnaha ahi waa iney xal-waara u raadiyaan dhibaatooyinka barakaca iyagoo adeegsanaaya wacyi-gelin iyo abuurridda xaalado horseedi kara qo'aan noqosho shaqsi ah, dhex-galka bulshada degaanka ah ama dib-u-dejinta barakacayaasha, taas oo lagu saleynayo joogteyn iyo duruufo amniga iyo sharafta dadkaas ilaalin kara.

2. Dawladaha Xubnaha ahi waa ineey barakacayaasha gudaha u suuro-gelinayaan iyagoo xor ah, warar ku filanna la siiyey inay kala doortaan inay noqdaan, in bulshada degaanka ah ay ku biiraan iyo in meel kale la dejiyo, iyaga oo arrimahaan lagala tashanaayo, isla markaasna la xaqiijinaayo ka-qaybgalkooda sidii xal waara looga gaari lahaa barakaca.

3. Dawladaha Xubnaha ahi waxay, markii ay suuro-gal tahay iyagoo la kaashanaya Midowga Afrika, ururrada caalamiga ama hay'adaha aadannimo iyo ururrada bulshada rayadka ah, si barakacayaasha gudaha loo gaarsiiyo dhawris iyo gargaar inta lagu hawllan yahay raadinta iyo fulinta dib-u-noqosho la isku haleyn karo, dhex-galiida bulshada degaanka ama meel-kale-dejin iyo dib-u-dhiska muddada dheer.

4. Dawladaha Xubnaha ahi waa iney abuuraan habab fudud, isla markaasna habboon oo markii loo baahdo lagu xallin karo murannada ka dhex-dhasha barakacayaasha gudaha ee ku saabsan hantidda.

5. Dawladaha Xubnaha ahi, mar walba waa inay qaadaan dhamaan tallaabooyin habboon oo lagu diyaariyo dhulka, bulshooyinka sida gaarka ah ugu xiran dhulalkooda, si dib loogu soo celin karo isla goorta ay ku soo noqdaan, bulshada ay ku soo baro-kaceen ku biiraan iyo marka meel kale la dejiyo loo fududeeyo dhexgalkooda.

## QODOBKA 12AAD
## MAGDHOW/CAWILCELIN

1. Dawladaha Xubnaha ahi waa inay siiyaan magdhow wax-ku-ool ah dadka uu barakacu saameeyey.

2. Dawladaha Xubnaha ahi waa inay abuuran hannaan sharciyeed oo, halkii ay suura-gal tahay, si caddaalad ku salaysan loogu mag-dhawo barakacayaasha gudaha ee barakaca awgiis uu khasaaruhu ka soo gaarey, taas oo waafaqsan xeerarka caalamiga.

3. Dawladaha Xubnaha ahi iyaga ayaa masuul ka ah magdhowda khasaaraha ku dhaca barakacayaasha gudaha marka Dawladda Xubinta ahi ay ka gaabsato inay dhawrto oo u-gargaarto barakacayaasha gudaha xilliga masuubooyinka dabiiciga ahi aay dhacaan.

## QODOBKA 13AAD
## DIIWAAN-GELINTA IYO AQOONSIGA SHAKHSIGA

1. Dawladaha Xubnaha ahi waa iney abuuraan mar walbana cusboonaysiinayaan diiwaanka dhamaan barakacayaasha gudaha ee ku sugan dhulka sharci ahaan u hoos-yimaada amaba si dhab ah ay iyagu u maamulaan. Iyagoo hawshaas fulinaya Dawladaha Xubnaha ah waxay la kaashan karaan ururrada caalamiga ah ama hay'adaha aadannimo ama ururrada bulshada rayadka ah.

2. Dawladaha Xubnaha ahi waa iney hubiyaan in la siiyo barakacayaasha aqoonsi-shaqsiyada lagama-maarmaanka u ah isticmaalka xuquuqdooda sida baasabboorro, waraaqaha aqoonsiga ee shakhsiga ah, shahaadooyinka madaniga ah, shahaadooyinka dhalashada iyo guurka.

3. Dawladaha Xubnaha ahi waa iney fududeeyaan soo-saarista aqoonsiyada cusub ama baddalidda aqoonsi-lumay ama xilligii barakaca ku baabba'ay, iyada oo aan lagu xireyn shuruudo aan maangal ahayn sida in qofka la weydiiyo inuu ku laabto degaankiisii hore, si uu u helo aqoonsiga kor ku xusan amaba kuwo kale oo uu u baahan yahay. Barakacayaasha gudaha oo aqoonsigaas la siin waayo, waa in la'aanta aqoonsigani uusan noqon mid dhib ugeeysta ama dhaawici kara amaba saameeyn ku yeelan kara xaqooda nolo iyo xuquuqdooda beni-aadannimo.

4. Dumarka iyo raggaa sidoo kale, carruurta aan waalidkood wehelin waxay si siman u leeyihiin xuquuqda ku saabsan helitaanka aqoonsiga shakhsiga ee lagama-maarmaanka ah, waana inay helaan aqoonsigaas oo iyaga magacyadooda lagu soo saaray.

## QODOBKA 14AAD
## DABA-GELLIDDA DHAQAN GALKA XEERKAN

1. Dawladaha Xubnaha ahi waxay ku heshiiyeen iney yeeshaan aqbalaana Shirweynaha Dawladaha Xubinta ah, si ay u ilaaliyaan Xeerkan, dibna u eegaan meelmarinta ujeeddooyinka Xeerkaan.

2. Dawladaha Xubnaha ahi waa iney xoojiyaan awoodda iskaashigooda iyo istaakulaynta dhexdooda ah, iyaga oo Shirweynaha Dawladaha Xubnaha ah ka dab-qaadanaaya.

3. Dawladaha Xubnaha ahi waxay ku heshiiyeen in Shirweynaha Dawladaha Xubnaha ah uu si joogto ah u qabsoomo, iyada oo Midowga Afrika uu fududaynaayo.

4. Dawladaha Xubnaha ahi markey soo bandhigayaan war-bixinadooda sida ku xusan qodobka 62aad ee Axdiga Xuquuqul Insaankaa iyo Dadweynaha iyo sidoo kale, markii aay suuro-gal tahay Hannaanka Toosan ee Dib-u-Eegista ee Afrika, waa iney muujiyaan tallaabooyinka sharci-dajineed iyo kuwa kale ee lagu hubinayo dhaqan-galka Xeerkaan.

## QAYBAHA UGU DAMEEYA

## QODOBKA 15AAD
## FULINTA

1. Dawladdaha Xubnaha ahi waxay ku heshiiyeen, haddii aan si cad loogu qeexin meel ka mid ah Xeerkan, qodobada xeerkaan waxaa lagu fulinayaa/dabaqayaa dhamaan xaaladaha barakaca iyadoon la eegayn sababaha keenay barakaca.

2. Dawladaha Xubnaha ahi waxay ku heshiiyeen inaan Xeerkan qodobadiisa sinabba loogu fasiran karin inuu siinayo xaalad sharciyeed, ama sharciyeynayo, ama aqoonsanayo kooxaha hubeysan iyo sidoo kale qodobada Xeerkaan ineysan ka cafineyn masuuliyad-ciqaabeedka xubnaha ururradaas sida waafaqsan xeer-ciqaabeedka wadaniga ah ama midka caalamiga ah.

## QODOBKA 16AAD
## SAXIIXA, ANSIXINTA IYO XUBINNIMADA

1. Axdigaan waxa uu u furan yahay Dawladaha Xubnaha ka ah Midowga Afrika inay saxiixaan, ansixiyaan, ama ku soo biiraan, iyadoo loo eegayo hab dastuurkooda.

2. Diiwaanka ansixinta ama ku soo-biiridda Xeerkaan waa in la dhigaa Xafiiska Madaxa Guddiga Midowga Afrika.

## QODOBKA 17AAD
## DHAQAN-GALKA XEERKAN

1. Wuxuu Xeerkani dhaqangal noqonayaa Soddon (30) maalmood ka dib marka shan iyo toban (15) ka tirsan Dawladaha Xubnaha ahi ay ansixiyaan amaba ay ku soo biiraan.

2. Gudoomiyaha Guddiga Midowga Afrika wuxuu Dawladaha Xubnaha ah ku wargelinayaa dhaqangalka Xeerkaan.

## QODOBKA 18AAD
## WAX-KA-BADDELIDDA IYO DIB-U-EEGISTA

1. Dawladaha Xubnaha ahi waxay soo gudbin karaan soo-jeedintooda wax ka baddelidda amaba dib-u-eegista Xeerkaan.

2. Soo-jeedinta ku saabsan wax-ka-baddelidda amaba dib-u-eegista Xeerkan waa in, si qoraal ahaan ah, loogu soo gudbinayaa Gudoomiyaha Guddiga Midowga Afrika madaxda ka ah, kaas oo isaguna soddon maalmood (30) gudahood markuu guddoomo ugu gudbinayo Dawladaha Xubnaha ka ah.

3. Shirweynaha Dawladaha Xubnaha ahi, kadib markuu Golaha Fulinta soo jeediyo, waxaa lagu baaryaa soo-jeedimahaas (wax-ka-baddelid iyo dib-u-eegis) muddo dhan hal (1) sano markii la wargeliyo kadib Dawladaha Xubnaha ah sida waafaqsan cutubka 2aad ee Qodobkaan.

4. Wax ka bedelidda iyo dib-u-eegista waa in laga ansixiyaa Shirka Dawladaha Xubnaha ah iyadoo la raacayo habka codeynta Dawladaha Xubnaha ah ee goob-jooga ah.
5. Wax ka bedelku waa inuu ku dhaqan-galaa sodon (30) maalmood gudahood, iyadoo la raacayo habka ah iney ansixiyaan shan iyo toban (15) ka mid ah Dawladaha Xubnaha ah una soo gudbiyeen Gudoomiyaha Gudiga Midowga Afrika.

## QODOBKA 19AAD
## DURRIDA (KA NOQOSHO)

1. Dowlad Xubin ahi waa aay ka noqon kareysaa Xeerkan xubin ka mid ah, iyadoo si qoraal ah u ogeysiineysa Gudoomiyaha Gudiga Midowga Afrika, isla markaana cadeeyneeysa sababata keentay ka noqoshada noocaan ah.

2. Ku dhawaaqidda ogeysiintaas waxay dhaqan-galaysaa hal (1) sano kadib, kolka Gudoomiyaha Gudiga Midowga Africa uu gudoomo qoraalka ogeysiiska ah, haddii aanan la qaban ammin kale.

## QODOBKA 20AAD
## BAABI'IN

1. Looguma fasiran karo qodob ka mid ah Xeerkaan inuu saameynayo ama hoos u-dhigayo xaqa barakacayaasha guduhu ay leeyihiin iney helaan magan-galyo waafaqsan Hanaanka Axdiga Afrika ee Xuquuqul Insaanka iyo Dadweynaha, iyo iney doonaan dhawris qaxootinimo, si waafaqsan Axdiga Dallada Midnimada Afrika ee 1969kii kaasoo quseeysay Maamulaya Xaalada Dhibaatooyinka Qaxootiga Afrika ama Axdiga 1951dii ee Qaramada Midoobey ee ku saabsana Xaaladda Sharciyeed ee Qaxootiga iyo sidoo kale Baratakoolka 1967dii ee ku saabsan Xaaladda Sharciyeed ee Qaxootiga.

2. Axdigaan wuxuu sugayaa iyadoo aan la kala dhantaaleyn xuquuqul insaanka barakacayaasha gudaha sida ku cad Axdiga Xuquuqul Insaanka iyo Dadweynaha ee Afrika iyo sidoo kale shuruucda kale ee la hal-maala ee Xuquuqul Insaanka iyo Xeerka Caalamiga ah ee Beni-aadannimadda. Si la mid ah, Sinnaba waa inaan loogu fahmin, loogu qaadan, ama loogu fasiran mid xadidaya, bedelaya ama laalaya dhawrista horey ugu jirtey shuruucda kor ku xusan.

3. Axdigani sinnaba maaha inuu u sameeyo, xaqa barakacayaasha guduhu u leeyihiin iney gal-dacwadeed u gudbiyaan Gudiga Xuquuqul Insaanka iyo Dadweynaha Afrika ama Maxkamadda Cadaaladda iyo Xuquuqul Insaanka Afrika ama hay'ad kastoo caalami ah oo awood u leh.

4. Qodobada Xeerkaan waa mid aan kala-soocin lahayn mas'uuliyadda dambi-shakhsiyeed ee dadka gudaha ku barakacay, iyadoo loo eegayo qaab dhismeedka shuruucda dembiyada qaranka ama caalamiga iyo waajibaadkooda ku saleysan Hanaanka Axdiga Afrika ee Xuquuqul Insaanka iyo Dadweynaha.

## QODOKA 21AAD
## AFEEFASHO

Dawladaha Xubnaha ahi waa ineysan sameyn ama qayb ka noqon ka afeef aan waafaqsanayn ujeedada iyo macnaha Axdigan.

## QODOBKA 22AAD
## XALLINTA KHILAAFAADKA

1. Khilaaf kasta ama aragti kala duwanaansho ka dhex abuurma Dawladaha Xubnaha ah ee ku salaysan fasiraada ama fulinta Axdigaan waa in lagu xalliyaa wada-hadal nabad ah iyadoo loo marayo wada-hadal toos ah oo ay yeeshaan Dawladaha Xubnaha ah ee ay khuseyso. Haddii lagu guul-dareysto xallinta khilaafka iyo kala aragti-duwanaanshaha, mid ka mid ah Dawladaha is-khilaafsan waa u gudbin karaan is-afgarad waaga Maxkamadda Cadaalada iyo Xuquuqul Insaanka ee Afrika.

2. Ilaa xilli inta laga abuuro dacwada, khilaafka ama kala duwanaanshaha waa in loo gudbiyaa Shirka Dawladaha Xubnaha ah, halkaasoo go'aan loo dhanyahay laga gaari kari, hadii kale see waxaa la marayaa cod ka qaadis iyadoo loo tix-gelinayo sadex meelood laba meelood (2/3) badi waxaana codeynaya Dawladaha Xubnaha ah ee goob-jooga ka ah Shirka.

## QODOKA 23AAD
## KEYDKA AXDIGA

1. Axdigaan waa in lagu keydiyaa xafiiska Gudoomiyaha Gudiga Midowga Afrika, isagoo u gudbin doona nuqulka saxda ee Axdigaan Xukuumad kasta oo Dawladeedu saxiixdey.

2. Gudoomiyaha Gudiga Midowga Afrika waa inuu ka diiwaan galiyaa Axdigaan Xogheynta Guud ee Qaramada Midoobey sida ugu dhakhsiyaha badan markuu Axdigu dhaqan-galo.

3. Axdigaan waxaa lagu soo saarey afar (4) luqad-qoraal oo asal ah; luqadaha Carabiga, Ingriiska, Faransiiska iyo Burtiqiiska, dhamaan afartuba (4) si siman ayey u yihiin rasmi.

**WAXAA ANSIXIYEY SHIRWEYNAHA GAARKA EE MIDOWGA OO LAGU QABTEY KAMBALA, UGANDA,**
**23 OKTOOBAR 2009.**